



NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.™

Helping Hand™

Health Education for Patients and Families

Xakameynta Dhalmada: Caaga Xakameynta Dhalmada Ilmo galeenka aan hoormonka aheyn (IUD)

Birth Control: Non-Hormonal Copper Intrauterine Device (IUD)

Caaga xakameynta dhalmada ilmo galeenka aan hoormonka aheyn (IUD) (Sawirka 1) waa qalab caag yar, qaabka-T ee ku duuban naxaaska oo leh labo xarig ku lifaaqan. Naxaaska IUD si tartiib ah ayuu ugu siidaayaa naxaaska ilmo galeenka oo ka illaalinayo in shahwada bacrimiso ukunta. Naxaaska IUD ma lahan wax hoormon ah.

Faa'idooyinka naxaaska IUD

- In ka badan boqolkiiba 99 way shaqeysay
- Waxay raagtaa illaa 10 sanno
- Badbaado ku ah naasnuujinta
- Gabi ahaanba lagu celin karo
- Shaqeysaa isla markiiba markii la geliyo
- Waxaa loo isticmaali karaa sida ka hortaga degdega ah
- Waxaa la geli karaa markaas dhalashada kadib



Qasaaraha naxaaska IUD

- Baraha u dhaxeeyo caadada ee dhoorka bilood ee koowaad kadib markii la geliyo waa caadi
- Maroojiska iyo raaxo la'aanta qaarkood ee waqtiga la geliyay gudaha
- Dumarka qaarkood waxay leeyihiin caado culus, oo muddo dheer.

Sawirka 1 Naxaaska aan hoormonka aheyn IUD

Sidee ayaa loo geliyaa gudaha

Naxaaska IUD waxaa geliyaa ilmo galeenkaaga daryeel bixiyaha caafimaad kadib baaritaanka ilmo galeenka. IUD ayaa laga geliyaa dhinaca furitaanka afka ilmo galeenkaaga ee ilmo galeenka. Xargaha gaaban waxay ka raaracayaan gudaha siilkaaga ee adiga iyo daryeel bixiyahaaga caafimaad dareemi karo si u hubiyo in IUD ay meeleysantahay. Waxaad dareemi kartaa maroojis iyada la gelinayo gudaha. Kala hadal daryeel bixiyahaaga caafimaad wax ku saabsan waxa la sameeyo haddii aad xanuun qabtid.

Sidee ayaa looga saaraa

IUD waxaa looga saari karaa booqashada sahlan ee xafiiska. Daryeel bixiyahaaga caafimaad ayaa gelinayo caaga (isla qalabka lagu isticmaalay baaritaanka ilmo galeenka) gudaha siilka si u sahliyo inuu arko xargaha IUD. Kadib isaga ama iyada ayaa si tartiib ah u jiidayo xargaha si uu banaanka uga bixiyo. Ka bixinta IUD waqti yar oo caadi ahaan way ka raaxo yartahay gudo gelinta. Haddii xargaha IUD aan la arki karin, ama IUD aan looga saari karin qaabkaan, waxaad u baahan kartaa baaritaan dheeraad ah.

Halisaha

- **Daloolinta:** Waa marmar, laakin IUD waxaa lagu riixi karaa gudaha iyo dhinaca darbiga ilmo galeenka iyada la gelinayo gudaha. Tani waxaa loo yaqaan daloolin. Mararka qaarkood qaliinka waxaa loogu baahanyahay si looga saaro IUD.
- **Ka saarida:** Mararka qaar IUD waxay si qeyb ah ama gabi ahaanba uga bixi kartaa ilmo galeenka. Kani waxaa loo yaqaan ka saarida. Uur ayaad noqon kartaa haddii ay dhacdo.
- **Uurka:** Halista uurka ee ay la jirto IUD aad ayay u yartahay. Haddii ay dhacdo, waxaa jiro halis sareyso ee uurka tuubada, caabuqa, ilmo ka soo dilanka, iyo foosha hore iyo dhalmada. Dhibaatooyinka waxay noqon karaan kuwa halis ku ah nolosha oo waxaan ku talinay in IUD laga saaro haddii tani ay dhacdo.
- **Caabuqa:** Aad ayay marmar u tahay, laakin IUD waxaa lagu xiri karaa Cudurka Bararka Miskaha (PID). Inta badan PID waxay ka dhacdaa gudaha sadex isbuucyo ee gelinta. Waxay ku xirantahay caabuqyada galmada laga qaado (STIs) sida bakteeriyaha yar ama caabuqa bararka. Caabuqa kadib 3 isbuuc aad ayay marmar u tahay.

Yaan isticmaalin karin iyaga

Naxaaska aan hoormonka aheyn IUD waa inaysan isticmaalin dumarka ee:

- Qabaa ama u maleeyaa inay qabaa caabuqa galmo ahaan laga qaado STI ama caabuqa miskaha
- Qabay caabuqa miskaha ee sadexdii bilood ee la soo dhaafay
- Qabaa kansarka ilmo galeenka ama minka ee aan la daaweynin
- Qabo cildaha qaarkood ee ilmo galeenka.

- Qabaa xasaasiyada naxaaska
- Qabaa cudurka Wilson
- Qabaa dhiig baxa siilka aan la sharaxin ee aysan kala hadlin daryeel bixiyaha caafimaad

U sheeg daryeel bixiyahaaga caafimaad haddii aad qabtid kuwa ka mid ah halista xaqiiqahaan ama xaaladaha, ama walaacyo kale ee caafimaad.

Goorta la Waco Dhakhtarka

Soo wac dhaqtarka ama daryeel bixiyaha caafimaad isla markaas haddii aad:

- U maleysay inaad uur tahay
- U maleysid inaad qabtid STI
- Qabtid daadashada siilka ee aan caadiga aheyn
- Qabtid qandho ama qarqaryo aan la filaneyn
- Qabtid xanuun ama dhiig baxa ee ay la jirto
- Qabtid dhiig baxa aan caadiaga aheyn ama dhiig baxa culus ee siilka
- Ogeysii isbadel walba ee baaxada xariga ama aad dareemi kartaa qeyb ka mid ah IUD
- Qabtid xanuunka miskaha aan caadiga aheyn, maroojiska, ama xundhur xanuunka (caloosha)

Ka hortaga STIs

Naxaaska aan hoormonka aheyn kama hortago caabuqyada galmada laga qaado (STIs). Kondhomyada waa qaabka ugu wanaagsan inay dadka galmo ahaan firfircoon inay yareeyaan halista caabuqa. Marwalba isticmaal kondhom markii aad galmo sameyneysid. Hel baaritaanada caafimaadka sannadlaha, oo ay ku jiraan baarida STIs.